

# *Kumuu Ahaa Marxuum*

## *Xaaji Cali Muxumed Guuleed*

(Cali Maarshaal)

September ,2009  
Mareegta Farshaxan

<i>Geeridu xaq weeyoo</i>	<i>Godka lama hurayee</i>
<i>Wayse kala guracantahay</i>	<i>Cali Geeridiisani</i>
<i>Goorxun ina haleeshoo</i>	<i>Geesibaa inaga baxay</i>
<i>Gabal baa inoo dumay</i>	<i>Hohee garashadiisii</i>
<i>Sida geel irmaanbaa</i>	<i>Lagu gaajo bixijiray</i>
<i>Nin gardaadshay maamuus oo</i>	<i>Gartuu madal ka niqi jiray</i>
<i>Guusha lagu hantiyi jiray</i>	<i>Gashaan biruu ahaa</i>
<i>Gadhwadeen aqoonloo</i>	<i>Wadnihiisu galow iyo</i>
<i>Gabashada aqoonnoo</i>	<i>Gayigana ku caanbaxay</i>
<i>Iyo Guurti buu ahaa</i>	<i>Guullow Allahayoo</i>
<i>Gurigii Fardowsiyo</i>	<i>Jannadaadii Gaadhsii</i>
<i>Annagana na garansii</i>	<i>Samir aan gabobayn</i>

Ammana Alla

Zeinab Xaaji Aadan

Mareegta Farshaxan  
September ,2009

Dhib iyo dheef kasta oo aduunka soo marta waxaa lagu suntaa oo baadisooc u noqda qaab kaydeedka ay u qoondeeyeen bulshooyinka aduunku.Taariikhuhuna kala mudan lana kala xusi og iyadoo loo eegayo maamuuska iyo milgaha ay leedahay dhacdada si gaar ah u cayintay milaygaa. Bisha April horaanteedii waxaa aduunka soo maray dhacdooyin badan oo tilmaantooda gaarka ah .

Ciyaaraha loo yaqaano Olympic games ayaa gu'gii 1896<sup>ki</sup> ay ugu horaysay in aduunka loo soo bandhigo ,halka gu'gii 1917<sup>ki</sup> dalka Maraykanku si badheedh ah shaaca uga qaadey inuu dagaal ku qaaadayo dawladii Jarmalka ,kana qayb qaadanayo ka lagu sheego dagaalkii koowaad ee aduunka.

Waxaana mudan in la sheego iyaduna in 1955<sup>ki</sup> iyo 1985<sup>kiiba</sup> dawlada Maraykanku hirgalisay tijaabo ah hubka dilaaga ee Nukliyeerka(atmospheric tests) ,kuna samaysay xarunta tijaabada hubkaas ee Nevada ,halka dawladii la odhan jiray midawga Soofiyet tijaabo tan la mid ah ay samaysay 1957<sup>ki</sup>.

Hase yeeshii taariikhda Somaliland horaantii bishaa April si soocan bay ugu suntan tahay oo gu'gii 1981<sup>kii</sup> ayaa ahaa xilgii la aasaasay ururkii SNM ee xornimada maanta lagu dhacadiidayo oo dhiig iyo maalba loo huray , waxaa sidoo kale maalin madoow loo tiriya 2008<sup>kii</sup> oo aheyd maalin ku mudnayd xukuumada madaxweyne Riyaale oo quudaysay kordhin markuu dhamaaday xili hogaamineedkeegii ayna ku guuldaraysatey qabashada doorasho dalka ka dhacda,golaha guurtiduna si sharci daro ah u baal mareen dastuurkii dalka u deganaa ,inkastoo xisbiyada mucaaridku ka roonaadeen danta dalka iyo ummadana eegeen.wadahadal oo ah tilmaantii gaarka u aheyd bulshada reer Somaliland ayey ummada Somaliland ku soo afjareen arintaa uur-ku-taalada leh ee taariikhda Somaliland indho ka qabsi ku keensanaya.

Waxaa kale oo tilmaan dheeraada u leh oo baalka sooyaalka Somaliland xaga horena kaga xardhan in isla bishaa April 1<sup>deedii</sup> gu'gii 1945kii ay aabo Muxumed Guuleed iyo Hooyo Canbaro Jaamac ugu wanqaleen wadanigii Cali magaalada Hargeysa ee caasimada Somaliland.



Cali wuxuu la dhashay afar wiil iyo afar hablood oo kala ah Rashiid ,Marxuum Axmed ,Cabdi ,Xasan ,Faadumo,Xaliimo Ruun ,iyo Sahra .

Cali wuxuu malcaamad Quraanka ka qaata Madarasada Sh.Baraawe, dugsiga hoosena wuxuu ka bilaabay kuna dhameystay dugsiga Riis ,isagoo ka dhexena ka galay dugsiga Axmed Guray oo dhamaantood ku yaala magaalada Hargeysa .Milay ku beegnaa 1963<sup>kii</sup> ayuu tagey magaalada Sheekh kana mid noqday ardeydi dugsigii sare ee Sheekh ,kuna dhameystay gu'gii 1967<sup>kii</sup> .Mudadan uu ku

jiray dugsiga sare waxaa hawlkarinadii uu muujiye sal u noqotay inuu hanto magaca loogu ladho kay aabihii iyo hooyadii ugu wanqaleen. Wuxaan goortaa ka dib magaciisu noqday Cali Maarshaal si loo muujiyo dadaalka dheeraadka ah ee uu leeyahay ,sameeyeyna intuu ardayga ahaa.

Markii uu dhameystay dugsigii sare sidii loo badnaa xilgaa wuu xoogsi tagey ,kana noqday dekada magaalada Berbera xisaabiye ,ilaa uu darajo heer maamuleed ka gaadhad. Hase yeeshii wuxuu door biday inuu iskii u shaqeysto una leexday dhinaca ganacsiga oo isaga iyo C/llaahi Xaaji Xuseen Cumar Xaashi bilaabeen shirkadii Hanti Wade oo sida laga wada dharagsan yahay dhinacyo badan oo nolosha bulshadii xilgaa saamaysay.

Xilgani waxaa dalka aad uga socday dagaal tilmaansan oo xukuumadii habaarrqabto uuna hogaaminayey habaarrqabe ina Siyaad si gaar ah isha ugu haysey xubnaha firfircoo ee ka soo jeeda halka iminka ah dalka Somaliland iyadoo qaarna xidhixidhay,qaarna ganacsiga cirka kaga laashay .Waxaa ayaan daro weyn aheyd in dekadii Berbera dad la xulay isticmaalayeen ama albaabadu u xidhnaayeen .Markuu xaalku sidaa ahaa ayey dad tiro leh oo u badnaa ganacsato iyo aqoonyahano ayaa go'aansadey inay Carabaha u goostaan .Kooxdan ayuu la jaanqaadey Marxuum Cali Marshaal oo wuxuu tagey Xajka

isagoo la wadaagey gudashada xilkan Ilahay hooyadii Canbaro ,halkuu kaga soo noqon lahaa dalka ayuu dhinacaa iyo Abu Dabay u xadhko xidhay kana bilaabay shaqo .



Muddo markuu halkaa ku sugnaa kana shaqeysaneyey wuxuu goostay inuu sii korodhsado waxbarashadiisa una baqoolay dalka Maraykanka ,degayna magaalada Milwaukee ee gobolka Wisconsin.Gobolkani waa meel aad u baraf badan inta u dhaxeysa bisha Oktoobar ilaa dabayaqaqada bisha April,aad baanay u dhaxan badan tahay .Waxay leedahay dhul beereed badan ,iyagoo waliba aad u dhaqda lo'da ,xasiiduna aad uga baxdo ,waana ta keenta in lagu magacaabo “dairy land ”.Gobolkani wuxuu ahaa mid aad ugu suntanaa bulsho weynta Soomaliyeed ee xiliga heli jirtay deeq waxbarasho ama iskood u soo bixi jiray iyadoo sidoo kalena gobolka California-yana uu qaabilay qaar kale oo ardeydaa ka mid ahaa . Waxaa jaamicada gobolka Wisconsin ee ku taala magaalo madaxda Madison(University of Wisconsin Madison) ka qalin jabiyey tiro badan oo aqoonyanadeena ah .Hase yeeshie Cali Marshaal wuxuu ka mid noqday ardeydi Jaamicada Markeet (University of Marquette) oo si gaar ah loo leeyahay.

Wuxuu si gaar ah u bartay cilmiga xisaabaadka taasoo awood badan u siisay inuu xeeldheere ku noqdo aqoonta xisaabaadka,maaliyada, hantidhawrka ,iwm.



Muuqaalka Jaamicada Maarkeet

Mar ay xubin ka mid ah bahda mareegta farshaxan u suurtogashay inay booqato jaamicada Marquette waxay la kulmeen magaca Cali Muxumed Guleed oo ku xardhan ardeydi jaamicada ka baxdey ee la tabayo halkay ku sugar yihiin ( missing Alumni ) .

## Xoogsi Tagis:



Sidaan kor ku soo sheegnay shaqadii ugu horaysay ee uu qabtay waxay aheyd inuu xisaabiye ka noqday dekada Berbera , ka dibna ganacsi gaar ah uyuu u tafoxaytay.

Dabayaaqadii todobaatanadii wuxuu shaqaale ka noqday cariga Imaaraadka ,halka uu gu'gii 1995<sup>th</sup> Cali Xaaji Muxumed Guuleed Allah ha u naxariistee uu ka mid noqday maamulayaasha sare ee Bangigii Horumarinta Afrika xaruntiiisuna

ahayd magaalada Abidjan ee dalka Ivory Coast.

Ka dib markuu ka soo wareegay magaalada Abidjan ee dalkaa Ivory Coast hal gu' ku dhawaad wuxuu ku mashquulsanaa mashruuc uu rabay inuu maalgelin ku sameeyo degaanka Haadaamo ee wadanka Itoobiya , hase yeeshee umay suurtogalin markii uu dawlada ka heli waayey taageero ogolaansho ah inuu u hawlgali karo hawlahaa

Gu'gii 2000 wuxuu Cali Marshaal u soo wareegay degayna magaalada San Jose ee gobolka Kaliforniya ee cariga Maraykanka .

Wuxuu hantidhawre ka noqday Santa Clara County, San José, California oo uu ka ahaa madaxsare oo haysta qaybta xisaabaadka ee Santa Clara Valley Transportation Authority

Xili ku beegnayd bishii Julaay 2005<sup>th</sup> wuxuu maalgaliyey kana shaqeyn jiray idaacad u adeegta danaha Somaliland iyo daryeelka dalka Somaliland.Waxaa idaacadaa oo maalinta Jimcaha galinka danbe soo gali jirtay lagu magacaabi jiray Idaacada codka Somaliland ee Waaberi.

Waxaanu ka mid noqday Golihii dhexe ee xisbiga Kulmiye, isagoo 17-kii July,2009, loo magacaabay gudoomiyaha guddida ololaha doorashada Gobolada galbeedka ee Xisbiga Kulmiye.

# **Wax qabadkii Marxuum Cali Maarshaal:**

Nina dhaqashuu kula dhex joogaa  
nin dhismahaagu ku dhabarjabay



- 28kii bishii 2003dii ururka IPRT ee uu hogaanka u hayo Dr. Axmed Ciise ayaa soo bandhigay fasal lagu qaadanayey casharada ku saabsan xisaabaadka , miisaaniyada, hantidhawrka, abla-ablaynta maaliyada ,iwm . Waxaa ardeydaa ka mid ahaa ilaa labaataneeyo ka socday hay'adaha Somaliland ee kala duwan sida golaha wakiilada ,saraakiisha sar sare ee wasaarada maaliyada , bangiga dhexe ee qaranka iyo dawlada hoose ee Hargeysa .Waxaa hagayey oo macalin ka ahaa casharadaa wadaniga marxuun xaaji Cali xaaji Maxamed Guuleed -Cali Maarshaal-.Si uu casharadaa u bixiyo wuxuu fasax ka qaataf shaqadiisa oo aheyd markaa xisaabiyaha sare ee maaliyada Valley Transportation Authority ee magaalada San Jose ee gobolka Kaliforniya ee cariga Maraykanka



4. 24. 2003 01:23

- Gabadha Xaawa Xuseen Xandule oo ka soo jeeda degaanka Somaliland ayaa bishii November 5<sup>dii</sup>, 2006<sup>dii</sup> Puntland lagu xidhay albaab aanu marxuun xaaji Cali xaaji Maxamed Guuleed -Cali Maarshaal-garaacin ma jirin.

Xaawa Xuseen Xandule waxay ku talo gashay inay soo booqato walaasheed iyo caruurteeda oo ku nool Boosaaso. Balse si argagaxiso ah ayaa askarta boolisku ugu taxaabeen jeelka Bosaaso oo noqday jeelka dawladda KMG ku ciqaabto haweenka. Denbi aanay gelin,aqoonna u lahayn ayaa loo been abuuray,markii hore waxa lagu soo oogay inay basaad u tahay dalka Somaliland.Waa arrin aad uga durugsan dhaqanka labada dal ee walaalaha ah Somaliland iyo Somalia.

Hadaba marxuum Cali maarshaal waxaa qaadanwaa ku noqotay in gabadh u dhalatay Somaliland ay xoriyadeeda waydo oo danbi aanay laheyn galina lagu soo oogo.Sidaa darted wuxuu waraaqo u kala diray dhamaan hay'adiihii uu is lahaa waxbay ka qabanayaan arintan oo ay ka mid ahaayeen Amnesty Internation , African Union , Human rights European union, US State department ,American Bar association, Foreign Minister of Eduaction , Igad ,iyo Saxaafada Geeska Afrika.Waxaa kaluu warqad u diray Jeneral Maxamed Muuse Xirsi (Cadoow) oo markaa haystay Puntland.

Waxaa kala qayb qaatey hawsha u doodidada gabadhaa oo garabkiisa joogay mar kast Axmed Cali Kaahin (Ina sadheyse),Xasan Mooge Xirsi ,iwm.

Wuxuu sidoo kale marxuum Cali Maarshaal u hawlgalay dhinaca kale inuu telefoon(Telefoon calls) kula xidhoo cid kasta oo uu filayey inay hawshan wax ka qaban karto, qayb xoog leh ayuu ka qaatey hadh iyo habeena kamuu seexan ,ilaa ay Xaawii dib u heshay xoriyadeedii.

- Cisbitaalkii Burco ee dadka Maskaxda:

Wuxuu Marxuum Cali Maarshaal ka mid ahaa xubnaha ugu firfircoo ee Somaliland Forum aadna heeganka ugu ahaa dhinaca dhaqaale, dhaqdhaqaaq ,

isku xidh ,iwm si uu u suurtogalo dhakhtarkaas ,loona helo dhaqaale joogto ah iyo maamul hanan kara xilkaa dibad iyo gudaba .Waxaa guul weyn oo la taaban karo ah in uu dhakhtarkaasi sidii loogu talogalay u hirgalay Marxuum Cali Maarshaalna himilo u dhaboowday u noqotay

- Maxaabiistii Puntland lagu xidhay ee reer Somaliland

Horaantii bishii Oktoober ee 2007 waxaa dagaal dhex maray Somaliland oo rabtay inay sugto xuduudaheeda iyo Puntland oo damac hayey .Hase yeeshee Guul ayaa u soo hoyatey Somaliland markii ay gaadheen xuduuda ,lana wareegeen dhamaan degaanka oo Laascaanood laga dhisay maamul Somaliland ah .Hase yeeshee waa dagaal iyo caadadiiye maxaabiis ayaa labada dhanba kala qabsadeen , markii la si dhaafsaadey maxaabiistaa ayaa xubno uu Marxuum Cali Maarshaal hormood ka yahay isla gudoonsadeen in waxtar lala gaadho mujaahidiintaa,waxaanay isaga iyo Rashiid Gaaruf u soo bandhigeen in waxtarkaa loo fidiyo ururka Somaliland Forum oo labaduba ku jireen .Si fiican ayey hawshaasi u qabsoontay oo hiil iyo hooba loogu fidiyey mujaahidiintaa . Marxuum Cali Maarshaal mashruucaasina mashruuuc fulay buu u noqday .

- Dadkii saxaafada ee maamulka jiraa uu xabsiga u taxaabay

Waxaa marxuum Cali Maarshaal aad loogu yaqaanaa inuu ahaa shakhsii neceb in qofka xoriyada laga qaado ,aad baanu uga soo hor jeeday xadhigii loo gaystay shaqaalihii saxaafada madaxa banana ee Somaliland .mar walbana si fiican ugu hawlgalay siidayntooda ..Tusaale ahaan xadhigii Saddexdii suxufi ee ka tirsanaa wargeysaka Haatuf. Marxuum Cali Maarshaal wuxuu ahaa xubinta ugu firfircooni ee dalka joogtay iskuna xidhi jirtay gudaha iyo dibada , muujiyeyna karti dheeraad si aanay nimankaa xidhani u dareeemin dhibaatada jeelka ,sugayeyna dhaqaalah la soo ururiyey inuu si toos ah u gaadho , kana hawlgalay siday xoriyadooda u heli lahaaayeen. Marxuum Cali Maarshaal mashruucaasina mashruuuc fulay buu u noqday .

- Dhakhtarka Gabiley

Marxuum Cali Maarshaal wuxuu qabanqaabiyey qayb libaaxna ka qaatey isku xidhkii dadkii dibada iyo gudaha ,markuu hirgaliyey in lagu wada xidhiidho bishii Nofember 14keedii 2005 si lacag ururin loogu sameeyo mashruucaas. Waxaa aad u dhibi jirtay dhakhtarka Gabiley ee dayacan ilaa iminka Marxuum Cali Maarshaal mashruucaasina inaanu fulin aad buu uga xumaa.

- Jaamicada Hargeysa

Waxaa uu ka mid ahaa xubnaha (friends of Hargeisa University oo uu hogamiyena ka yahay Bulaaleh .Wuxuu u gacan furnaa inuu had iyo jeer huro dhaqaalihiiisa iyo waqtigiisa si jiritaanka iyo dhismaha jaamicadaasi u hanoqaado .Wuxuu qayb axaad leh ka qaatey u iibinta jaamicada Bas , gaadhi Pick up ah , iwm..

- Dhanka kale marxuum Cali Marshal wuxuu ka mid ahaa aasaasayaashii Xisbiga siyaasiga ah ee Kulmiye, Idaacada Horyaal iyo Raadiyow Waabari oo uu dhamaan dhaqaalaha ku baxey ayna ku socotay isagu jeebkiisa ka bixiyey.

Dadka aad u yaqaanay waxay ka warameen inuu mashaariic badan ka qayb qaatey ,Bashe A.Cumar oo ka warmayana wuxuu yidhi: “Waxaa u ahaa nin wax tar leh ,waxaa uu qayb lixaad leh ka qaatey mashaariic samafaleed oo ururka Somaliland Forum oo uu xubin ka ahaa iyo jaaliayadaaha Somaliland ee qurbojoogu fuliyeen ”.

- Naqdinta Miisaaniyada Somaliland:

Waxaan marna maanku hilmaanayn sidii habsamida iyo hufnaanta laheyd ee uu u hufi jiray miisaaniyada ay dawlada Somaliland soo bandhigto gu' walba , isagoo bulshada u balbalaadhinaya miisaaniyada , dawladaha Somaliland-na u sheegaya waxay malmaluuqayaan in lagu garanayo .Wuxuu marxuun xaaji Cali xaaji Maxamed Guuleed -Cali Maarshaal- lahaa sedan: “Miisaaniyadu cilmi uun uma baahna ee caqli ayay u baahan tahay miisaaniyadana caqligii ayaa ka maqan. Sannad walba miisaaniyada<sup>1</sup> Somaliland (SL) waan naqdiyaa aniga oo soo shaac bixinaaya madmadawga ku jira si gaar ahna u qiimeynaaya tayada miisaaniyada. Caado la gooya cadho ALLE ayaay leedahy ee miisaaniyada sannadkan 2006 oo aan faaqidayna waa tan. Waxa kale oo aan sannadkan idin soo gudbinayaa miisaaniyad aan anigu hadan ahey Cali Gulaid soo diyaariiyay oo ku saleysan dakhliga xukuumadu qiratay oo aan garab dhigaayo ta xukuumada ee bal labada isu baaciya”.

Isagoo marxuum Cali Maarshaal fariinta ay miisaaniyadaasi waday ummada la wadaagayeyna wuxuu lahaa : “sida ku qayaxan miisaaniyadani waa mid xooga la saray sirdoonka iyo ciidamada sidii kuwii hore. Wuxuu marxuum Cali Ducaale ku hal qabsaday markii uu miisaniyada u gudbinaayay Golaha Wakiilada ee ahaa sidan, “ Wasiirka Uganda ayaa aniga iyo Wasiirka Khaarajiga Marwo Edna Adan nagu yidhi ictiraaf waxa idiinku dhaw ciidan xoog weyn oo aad sameysataan”. Haddi aay taasi dhab tahey miisaaniyadani waa tii Somaliland lagu ictiraafi lahaa waayo boqolkiiba in ku dhaw lixdan (60%) ayaa sirdoon iyo ciidan ku baxaysa. Taasina waa wax dumis. Wuxuu marxuum Cali Gulaid oo ayaan garab dhigaayo ta xukuumada ee bal labada isu baaciya”

---

<sup>1</sup> Dhamaan qoraalada uu ka qoray marxuumku naqdinta miisaaniyada waxaad ka heli kartaa mareegaha af-soomaliaga sida Somaliland.org ,haddii kale codsigaaga u gudbi somaliland@farshaxan.com

## Geeridii Marxuum Xaaji Cali Maarshaal

*Geerida Cali-maarshaal bay galabtaa naadsheene  
Gaadhi qallibmey bay sheegayeen gama' la'aantayda  
Gashaan iyo xijaabuu ahaa geesigaa tegeye'  
Gacal iyo sokeeyuu ahaa aan gujo aqoone  
Goobaha la joogona wuxu ahaa dooda gabankeede  
Geed buu ahaa hadhloo sharafi goobtaaye  
Garyaqaan hadlabuu ahaa gole lasoo buukshey  
Gaadh iyo aqoon hagta-buu ahaa garabka Siilaanyo  
Gobanimo Ninkeed buu ahaa gees-la' eegoba e  
Gabal baa u dhacay Xirsow garo shaxdeeniye  
Geeridu xaq weeyee falbaan gocanayaa mooyi  
Gebigood cadowga Somaliland waa u garoon xaadhe  
Gefka waxay u faashaan xumaan gaasaskaa hadhay e  
Gurigiisa janno Illaahow ka yeel guulna waan sugiye  
Geyigana Allow noo xoree waa gob ducadeede  
Guntigoo la gjijaa inaga xiga guusha Kulmiyow e*

Ahmed Yussuf Dualeh (Dhigane) | August 6th, 2009 at 4:57 pm.



Bishii April 6,2009 waxaa daaweyn ka dib dhinacaan dalka Kenya ka soo baqoolayey gudoomiyaha xisbiga mucaaridka ah ee Axmed Maxamed Maxamuud "Siilaanyo".Wuxuu ka soo dagayey madaarka Berbera. Waxaa dhinaca Hargeysa ka hawlgalay oo u diyaargaroobayey inay ka hortagaan soona dhaweeyaan madaxdii xisbiga Kulmiye . Gudoomiye Xigeenka labaad ee xisbiga Kulmiye Cabdiraxmaan Cabdulqaadir oo ka waramaya siday u ambabaxeen una waramyey bahda Tv Universal ayuu yidhi : " Iskumaanan ogayn in Aniga Iyo Cali Marshaal isa soo raacno ,waxaanuse isku ogayn inaan aniguna gaadhigiiisa soo kaxeysto , isaguna gaadhi kale soo raaco, hassee yeeshee subaxii ayaa waxaa gurigayga iigu yimid Marxuum Cali Marshal iyo Maxamed Xaashi Cilmi oo wada socda , marxuum Cali baana ii dhiibay furihi gaadhigiiisa iguna yidhi hoo adigu kaxee , waxaanu Marxuum Cali Maarshaal koray xaga danbe ee gaadhiga ,waanu soo tawakalnay markaanu dhexda marayno aad baanan u soo degdegaynay oonu is laheyn diyaarada kaga gaadha airport-ka ,dhexda markaanu maraynay baa Cali telefoon loo soo diray ,waxaana la yidhi diyaaradii way timid ,markaasaanu speed-kii yaraynay waana meel uu Illaahay wax ka Wade maalintiisii bay aheyd shilkaasi shil la qoray oo qadara ayuu ahaa uuna marxuumkaasi ku

dhintay,anigana dhaawacaasi igu gaadhay ” .Shilka halkaa ka dhacay waxaa ku naf waayey Marxuum Cali Maarshaal oo tii Illaahay halkaa ku haleeshay, Wuxaan gacanta ka jabay Maxamed Xaashi Cilmi , halka uu Cabdiraxmaan Cabdiqadir uu dhaawac halis ahi ka soo gaadhay oo loogu qaadey dalkaa Kenya ,loogana sii gudbiyey cariga Ingiriiska oo uu iminka ku sugaran yahay dhakhtarka weyn ee St. Thomas Hospital .

Marxuum Cali wuxuu ifka kaga tagey afar caruur ah oo kala ah Faadumo, Rooble, Geeleh, and Mahad , halka uu awoow uga ahaa laba caruur ah ooy dhashay inantiisa Faadumo oo u dhaxday Cumar Sanyare X.Cali.Wuxaan u dhaxay saddex dumar ah oo kala ahaa Aamina Tahar, Farxiya Cumar Fuul ,iyo Yaasmiin Zakaale.



## Ramaas

Marxuum Cali Maarshaal waxaa si heer qaran ah loogu aasay xabaalah Boqol-jire ee duleedka Hargeysa bishii ogosto 7<sup>di</sup>, 2009. Aaska Marxuum Cali Muxumed Guuleed (Cali-Marshaal) waxa ka qayb galay Hoggaanka sare ee Xisbiyada Mucaaradka ah ee Kulmiye iyo UCID, Xoghayaha guud ee Xisbiga UDUB, labada Shirguddoon ee labada Gole Baarlamaan, Wasiiro, Culima'udiin, Ganacsato, Aqoonyahan iyo boqollaal dadweyne ah oo kale.

Dr. Maxamed Cabdi Gabboose oo ka mid ahaa Masuuliyiintii halkaa ka hadlay, ayaa geerida marxuumka ku tilmaamay mid uu ku garab waayay. “Waxay ahayd Geeri naxdin leh, aqoonyahanka iyo waayeelka Umaddan ayuu ahaa. Xisbiguu doono ha ku jiro ee wuxuu ahaa qof culus oo Qarankan ka baxay, gaar ahaan Aniga gaar buu ii sii taabanayaa oo waxa Xisbiga Kulmiye noo wada xil-saaray hawl. Markaa garab iga baxay weeye. Waxa kaliya ee aan odhan karaa waa, in Illaahay Jannadii Fardowsa ka warabiyo, umaddana uu cawil kheyr qaba ugu bedelo, dalkana halgankii uu ku jiray ee uu lahaa ka midho-dhali isagii dhimay ee ficiikiisii uu noqdo mid sii nool.”

Mohamoud Hersi H Hassan Qaraami oo ka hadlayey geeridaa ku timid Marxuum Cali Maarshaal ayaa yidhi :“ Cali Maarshaal kuma goblamayaan qoyskii uu ka geeriyooday oo keliyihii ee waxaa ku goblamaya qaranka Somaliland oo dhan. Cali face-to-face ulamaan kulmin laakiin waxaan si wacan ugu bartay Internetka anigoo markii ugu horeysey ku bartay Golaha Somaliland Forum sanadkii 2002 oo aanu xubno kawada ahayn. Cali wuxuu ahaa aqoon yahan naftiisa, maalkiisa iyo waqtigiisaba u huray qadiyada Somaliland isagoo hadh iyo habeenba u dagaalamayey danta iyo maslaxada Somaliland iyo siduu u fashilin lahaa shirqoolada cadowga Somaliland kuwa gudaha iyo kuwa dibedaba”.

Sidoo kale waxaan qalinkiisa hakinin Khadar Xasan Cali oo ka tirsan wargeyska Jamhuuriya eryadana si farsahnimo u dhigay : “Marxuum Cali Xaaji Muxumed Guuleed, wuxuu ahaa aqoonyahan weyn oo magac iyo maamuusba ku dhex lahaa bulshaweynta reer Somaliland dibbada iyo guddahaba, waxaanu ka mid ahaa dadkii qurba jooga ahaa maalkooda iyo maskaxdooda u hurey sidii dalka looga xorreyn laha taliskii diktaatoorka ahaa ee Siyaad Barre. Waxa kale oo uu door muhiima ka qaataay mashaariicda horumarineed ee qurbajoogu dalka ka hirgaliyeen”.

*Geesi iyo halyay baa ka baxay goboladeenii  
Geed baa ka jabay Faraaxow gaafihii Herer  
Gobanimo u dirir buu ahaa neceb gumaystaaye  
Gantaal iyo mariid buu ahaa gana shisheeyaaye  
Maarshaal garooma leh buu ahaa guluf colaadeede  
Garaad iyo aqoon buu lahaa guud cadaadiya  
Nin u gaadhan uun buu ahaa madal gobaabeeede  
Danyar loo gargaaruu jeclaa gacan la siyaaye  
Gadac buu ahaa aan marnaba gabin dadkiisiye  
In la go’ayo geeridu xaq tahay taa garawsaniye  
Gurigii jannada eebeheen haw gudoon furo  
Godka iyo xabashana yaanay helin gubasho naarede  
Galalkii fardawsuu awliyada gacashan doonaaye  
Galbayaye xasuustiisu waa nagama guuraan*

K.J.I(Aw Daahir Kaynaan )

## Xusuus:

Mohamoud Mohamed Egeh oo soo koobay ayaa qoraal ku dhigay in tilmaamaha Marxuum Cali Marshal loo tiriyey ay ka mid ahaayeen kuwani

- 1) WADANINIMO
- 2) DACADNIMO
- 3) GEESINIMO
- 4) AFTAHANIMO
- 5) DEEQSINIMO
- 6) IYO WALIBA BULSHO NIMO.

Waxaa dhamaan dadka aqoonta u lahaa ama xidhiidh la lahaa qoraaladiisa ama ka soo hor jeeday aanay isku diidayn inuu ahaa wadani ,dad jecel oo u damqan jiray danyarta iyo cidii uu kaalmo u fidin karayaba .Wuxuu marxuum Cali Marshaal heersare ka gaadhay aqoonta xisaabaadka ,hantidhawrka ,iwm. Wuxuu ka gaadhay nolosha gaar ahaaneed inta qof keli ahaan qabsan karo inta mudan wuxuuse shaqadiisii iyo noloshiisii gaarka aheyd uu dhamaan u sii daayey daryeelida iyo dayac tirka baahida taalay dhulkiisii hooyo ee Somaliland ,waxaana kuu muujinkara oo ka markhaati kacaya mashaariicda uu hagayey ama uu ka qayb qaatey eek u baahsan dhulka Somaliland cidhif ilaa cidhif. Wuxuu marxuum Cali Marshaal ugu heelanaa uguna firfircoona waxqabadka dadkiisa .

Marxuum Cali Marshaal wuxuu aduunkiyada ku lahaa magac iyo maamuus lagu qadariyo laguna ixtiraamo ,insha Allah Aakhirana Ilaahay ha manaysto Jannatu Fardawsaa

*Geerida Cali-maarshaal bay galabtaa naadsheene  
Gaadhi qallibmey bay sheegayeen gama' la'aantayda  
Gashaan iyo xijaabuu ahaa geesigaa tegeye'  
Gacal iyo sokeeyuu ahaa aan gujo aqoone  
Goobaha la joogona wuxu ahaa dooda gabankeede  
Geed buu ahaa hadhloo sharafi goobtaaye  
Garyaqaan hadla buu ahaa gole lasoo buuxshey  
Gaadh iyo aqoon hagta-buu ahaa garabka  
Siilaanyo  
Gobanimo Ninkeed buu ahaa gees-la' eegoba e  
Gabal baa u dhacay Xirsow garo shaxdeeniye*

*Geeridu xaq weeyee falbaan gocanayaa mooyi Gebigood cadowga Somaliland waa u garoon xaadhe  
Gefka waxay u faashaan xumaan gaasaskaa hadhay e  
Gurigiisa janno Ilaahow ka yeel guulna waan sugiye  
Geyigana Allow noo xoree waa gob ducadeede Guntigoo la giijaa inaga xiga guusha Kulmiyow e.*

Axmed Yuusuf Ducaale “Dhigane”

They have announced the death of Ali Marshal

About an overturned vehicle. Oh my sleeplessness  
A shield and a protection was that departed hero  
A close and valued ally who never would nudge  
He was the leading anchor in public debates

He was a shady tree surrounded with nobility  
An excellent orator in public forums. Guard and Guiding knowledge for Silanyo's shoulder

He was a man of freedom however way I look  
Darkness have descended Oh Herzi upon our goals

Death is inevitable yet am I feeling..... what?For all the enemy of Somaliland is it an open field

Fault and evil perpetrators is all that left behind

Oh Allah make Jannah his abode as I wait for victory And  
Make our country free for this is a place of prayer

Translated by : Hajiyah Rhoda Rageh

Aqoonyahanada Rhoda Rageh oo ka warameysay Marxuum Cali Maarshaal waxay qalinka ku duugtay “Geeridu waa lama dhaafaane,marxuum Cali Marshaal wuxuu ahaa daacad runta ku suntan ahna tilmaan dadka wataa ay ku yar yihiin dalkeena .Wuxuu ahaa wadani dal jecel una hibeeeyey dalka aqoontiisa gaarka ah iyo tamartiisa wax qabadba .Geeirdiisu waxay dhirbaaxo dhib badan ku noqotay wadanka Somaliland.waxay dhabarjab ku noqotay kuwa jecel dalka ,farxadna u noqotay kuwa dalka aan danayn.” .Rhoda Rageh waxay sii waday inay tilmaamaha uu ku sifoobay sii wadao iyo heerka waxqabad ee uu gaadhisiiyey mashaariida uu ka hawlgalay ,waxaanay ku soo xidhay odhaaha ah “ Hadaad marxuum Cali jeceshahay ,u hawlgal wuxuu qaban jiray ee uu jeclaa , sii wad iftiinkuu shiday iyo isha rajeed ee uu u bildhaamiyey dalka iyo dadkaba”.

Bashe A.Cumar ayaa sidoo kale ka hadlay xusuus ka waranka Marxuum Cali Maarshaal ,yidhina: “Cali Maarshaal wuxuu ahaa aabo aad u naxariis badan ,aadna ula socon jiray cid kasta oo uu arko in ay taakulayn u baahan tahay,magaalada uu markaa joogay ee San Jose .Ma haeyn qof sheega ama ku faana wax qabadkiisa iyo cida uu markaa wax taray. Wax uu lahaa shahsiyad aan laheyn wax aad ku diido,waxaana uu mar kasta ka shaqeyn jiray wanaag iyo in uu markaa jaaliyadii halkaa joogtay isku wado .”

## Baroordiiq:

“Gabbal baa u dumey reerihii guuldariyo hooge  
Abidkii rag waa go’i jiree tanise waa gaw’e  
Gaashaan biruu noo ahaa geesi aan biqine  
Gole igu bannaanaa wallee garab la’aneede”

C. J. Habil

Waxaa socdaal kaga soo kicitimay magaalada Nairobi,Kenya gudoomiyaha xisbiga Kulmiye kuna soo degayey madaarka weyn ee Berbera.Waxaa is xilqaabey dhawr ka tirsan madaxda sarsare ee Xisbiga Kulmiye una baqoolay si ay u soo dhaweeyaan gudoomiyaha . Wuxaase lama filan waa noqotay bishii Ogoosto 6 deedii 2009kii in uu gaadhigii ay la socdeen Cali Muxumed Guuleed –Cali Marshaal oo ahaa , Maxamed Xaashi Cilmi iyo

Cali waxaa u dhaxay saddex dumar ah oo kala ahaa Aamina Tahar , Farxiya Cumar Fuul,iyo Yaasmiin Zakaale.Waxaanu marxuun Cali Marshaal ifka kaga tagey afar caruur ah iyo uu awoow u yahay : Faadumo oo u dhaxday Cumar Sanyare X.Cali iskuna leeyihiin laba caruur ah

## Gunaanad :

Geeridani waxay dareen naxdin leh ku kulmisay dhamaan mucaarid iyo muxaafid oo aad uga xumaaday .Waxaana la yaab leh in in ka badan shan maanso loo hibeyey ,halka ay Rhoda Raageh intooda badan u af celisay afka Ingiriisiga .Qof waliba wuu dirnaa waxaanu dareemayey halka banaanaatey qarankii iyo qowmiyadii Somaliland.



Sidoo kale waxa xaflad baroordiiq ah laga sameeyey magaalada Toronto ,oo dadweynaha daafada dunida ku kala noolna loo ogolaadaey inay si “teleconference” ah uga soo qayb gali kareen .Bahda mareegta farshaxana fursadaa ayey aad uga faa’iidaytay kana qayb gashay kulanka .waxaa sidoo kale Waxa maalintii Axadda eey bishu ahayd Augost 9, 2009 ka dhacay Hall ku yaal magaalada Minneapolis ee gobol-ka Minnesota kulan xus iyo duco isugu jira oo

loo sameynayey Rabbi naxariistii janno haka waraabiyye madaxii ololaha xisbiga kulmiye u qaabilansaa gobolada galeedka Marxuum Cali Maarshaal .

Haddii mawduu ruux daynayoo dunidu waaraayo  
ambiyadii ayaan laga dileen laysu soo diraye  
In dadoow la wada mootan yahay waa daliil dhaba’e  
hadbase taw danbaysaa Nafluhu dib u xasuustaaye

Hadii maanta duug lagu hubsaday Dirici Maarshaalba  
halyey diran dulqaad iyo wanaag daacadnimo sheegtay  
dun wanaag daryeelkiyo xaquu abid la duubnaado  
salaadaan daayicin waqii duug intuu jiraye  
allaylehe nin damaluu ahaa Daacada ilaahe,

Duco iyo waxaan marinayaan diin intaan kare  
dariiqii rasuulkiyo kuwaad siisay derajaadka  
Janadaada doorka ah kuwaad daarta uga yeeshay  
ee naarta laga dayray iyo diga kulaylkeeda,  
adaa daayinow kara waxaan cidina diidayne  
Naxariista duugmada markaa laga dareerayo  
malagyada la soo diray midkaad dowga garansiiso  
dibnihiisa tawxiid midkii kara dabuubaada  
ee aan dariiqii ka lumin dawyada siraadka

Allaha daayinow inaad janada meelsan uga doorto  
Oo fardawsaa uu degoo ayaan kaa duraansadaye,

dayartiyo agoontuu ka tegay daa'imiyo maato  
samir aan ka duugoobin iyo doobi naxariisa  
iyagana docdoodii ka yeel daawa lagu raysto  
Anaguna diwaanada tacsida waa u diraynaaye  
Kulmiye iyo dadweynuhaba waw maalin dayra ahe  
damiirkiyo caqliga iyo jidhkaa noo dubaaxsamaye  
Xusuustiisa baan naga damayn boqol diraacoode  
Allahayoow digniin noogu filan duubigaa jabay

Mubarak Mohamed Nur(qoorubaxay)

“Death is inevitable. Everyone will die. Undoubtedly Ali Marshal was an honest truthful man- something that has become a rare commodity in today’s Somaliland. He was also a man who loved his country, who wanted to give all his energy, expertise and education to Somaliland. His death is a terrible blow to Somaliland itself. It is a broken levy for those who loved their country like he did. It is also a short joy for the enemy of Somaliland especially the enemy in Somaliland. **If you loved and respected Ali do what he loved most. Carry the torch from where he left it and be the beacon of hope for your country. We will truly miss his candid approach to life.** His sincerity, his wisdom and background. May Allah swt give sabr to all of us especially his children and May Allah swt bring forward serious individuals who will work like Ali for Somaliland, for posterity and for Ali’s unwavering desire to see a solid Somaliland for all of us. I will always hold him dear and respectable friend to all of us”. **Rhoda Aideed Rageh** | August 6th, 2009 at 5:58 pm  
Ilaahay Janatu fardawsaa ha ka waraabiyo adoonkiisa marxuum Cali Maarshaal

*Himiladii Cali Maarshaal*

*Hilinkeeda ku jooga*

Qoraalkii iyo Isku dubaridkii :

Fu,aad Sh.Abuubaker  
Bahda Mareegta Farshaxan

**Tixraac:**

<http://www.worldofradio.com/dxld5167.txt>

<http://www.marquette.edu/eop/MissingAlumniG-M.shtml>

[http://www.iprt.org.](http://www.iprt.org)

Mareegaha :

Waryatv , Somaliland.org, gabileynews.net , hadhwanaagnews.com, ramaasnews.com,

Maqaal , Jamhuuriya Times London uuna qoray Khadar Xasan Cali

Wareysi bahda farshaxan la yeelatay Xasan Mooge

Wareysi bahda farshaxan la yeelatay Cumar Sanyare Xaaji Cali

Wareysi farshaxan la yeelay Faadumo Cali Muxmed Guuleed (marxuumka inantiisii)

Qoraalkii iyo Isku dubaridkii :

Fu,aad Sh.Abuubaker  
Bahda Mareegta Farshaxan